Aqoonta Eray Aan Macno Lahayn

Ku dhawaaqista erayo la sameystay | Fasalka Barbaarinta, fasalka 1'waad iyo fasalka 2'baad

Waxay Degmada Dugsiga Midaysan Ee San Diyeego isticmaashaa mCLASS DIBELS 8 si ay ula socoto horumarka xirfadaha akhriska ee ilmahaaga inta lagu jiro sannad dugsiyeedka. Isticmaal haggahaan kooban si aad u fahamto imtixaanka hoose ee Aqoonta Magacaabista Eray Aan Macno Lahayn (Nonsense Word Fluency [NWF]) ee fasalka Barbaarinta, fasalka 1'waad iyo fasalka 2'baad si aad u ogaato habab fudud oo ciyaar u eg oo aad guriga ku wada tababaran kartaan.

Waxyaabaha aan ka shaqeynayno

Ilmahaagu wuxuu akhriyaa erayo la sameeyay sida "zim" ama "fum"; ma aha ereyo dhab ah. Arrintaas waa mid ula kac ah. Waxay caddaynaysaa in ilmahaagu uu si dhakhso ah u isticmaali karo dhawaaqyada xarfaha si uu u fahmo eray kasta, halkii uu ku aqoonsan lahaa keliya erayo uu horay u xifdiyay marki uu arko. Haddii ilmahaagu uu ku dhawaaqi karo eray la sameeyay, waxay haystaan awoodii ay ugu dhawaaqi lahaayeen eray kasta oo dhab ah xitaa, taas oo ah waxa saxda ah oo ay xirfadaan qiimeynayso. Tusaale: fan-tas-tic.

Xirfadaha ay arrintaan sii dhisto

Wacyiga dhawaaqyada xarafka goonida (phonemic) Maqlida iyo kala furfurida dhawaaqyada ku jira erayada lagu hadlayo.	**Dhawaaqa xarfaha** Ogaanshaha dhawaaqa uu xaraf kasta sameeyo.
Xigmada erayada In la fahmo in erayada qoran ay ka kooban yihiin xarfo isku xiga.	**Isku-darka kor loogu dhawaaqayo** Awooda lagu mideyn karo dhawaaqyada lagu hadlo si ay u noqdaan eray dhammaystiran.

Habab xiiso leh oo guriga loogu sameeyo tababar - *5 ilaa 10 daqiiqo, dhowr mar asbuuci*

Ciyaar erayo oo madadaalo ah 3 daqiiqo	Wada sameysta erayo aan macno lahayn oo idinka idiin gaar ah, ka dib'na isku beddel-beddela ku dhawaaqidooda — carruurtu badanaa waxay u arkaan arrintan mid aad u xiiso badan.
Kaararka dhawaaqa xarfaha 2 ilaa 3 daqiiqo	Muuji xaraf, oo ka codso ilmahaaga inuu ku dhawaaqo dhawaaqiisa, ee uusan ku dhawaaqin magaciisa. Dib ugu noqo kuwa dhibka badan dhowr jeer oo dheeraad ah.
Ku dhawaaq, ka dib'na isku dar. 5 daqiiqo	Tusaale ahaan u tus ku dhawaaqista dhawaaq kasta ee ku jira eray si tartiib ah iyada oo aan la joojin, sida /mmmaaat/, ka dib'na ilmahaaga ha isku dayo, ka dib'na si caadi ah u dheh erayga.
Erayada xarfaha taayilka ah oo ah xarfihii oo la isku xijxijinaayo (letter tile) 6 ilaa 8 daqiiqo	Isticmaal xarfaha taayilka ah si aad u sameyso eray fudud oo ah mid la sameystay ama mid dhab ah, si wadajir ah ugu dhawaaqa, ka dib'na beddel hal xaraf oo mar kale akhri.

Waxyaabaha la eegayo

* Haddii uu ilmahaagu ku dhawaaqi karo dhawaaqa xaraf kasta, laakiin uu ku dhibtoonayo inuu isku daro uuna ka dhigo eray, taasi waa talaabo caadi ah oo ku xigta; tababarka ku samey ku celcelinta ee ha ku sameynin dhawaaqa xarfaha oo dheeraad ah.
* Haddii ilmahaagu u muuqdo inuu qiyaasayo halkii uu ku dhawaaqi lahaa, si tartiib ah u gaabi oo isla markiiba si wada jir ah ugu dhawaaqa.

* Haddii ku dhawaaqista erayo fudud oo la sameeyay ay weli aad ugu adag tahay ka dib markaad si joogto ah ugu tababarateen, la'tasho macalinka.

Xusuusin gaar ah oo ku socota qoysaska:

- **Erayada la sameeyay uma baahna in la xifdiyo.** Waxay ka caawiyaan macalimiinta inay arkaan sida ilmahaagu u isticmaalo dhawaaqyada xarfaha si uu u akhriyo erayo uusan aqoonin.
- **Ku tababaro erayo dhab ah xitaa.** Isticmaal erayo fudud oo leh dhawaaqyada xarfaha uu ilmahaagu yaqaano. Ka caawi inay ku dhawaaqaan dhawaaqyada iyo ay isku daraan.
- **Caawimaad sii adigoon degdegin.** Haddii uu ilmahaagu ku dhibtoodo, tus sida loogu dhawaaqo, ka dib'na isku wada daya. Macalinkooda weydii dhawaaqyada ama qaababka erayada oo ay tahay inay ku tababartaan.